# QORSHAHA MAARAYNTA CABASHADA ee Adeegga Gaadiidka Dadweynaha ee Victoria (Public Transport Industry)

## Fullinta iyo Maareynta Cabashooyinka, Barashada iyo Hagaajinta

# Table of Contents

1 Horudhac ..... 3
1.1 Horudhac ..... 3
1.2 Codsiga iyo qeexidda ..... 3
1.3 Xeerarka maaraynta cabshooyinkeena ..... 3
2 Habraaca maaraynta cabashooyinkeena ..... 5
2.1 Diiwaangelinta iyo go’aannada hore ..... 5

# 1 Horudhac

## 1.1 Horudhac

Adeeg ahaan, Waxaan balanqaadnay inaan siino adeeg sare macaamiisheena. Waxaan qadarinaa ra'yi-celinta maaddaama ay nagu caawinayso inaan fahamno waayo-aragnimada macaamiisheena iyo sidaan usii wadi karno daboolidda baahiyahooda.

**Waxaan qadarinaynaa xaqaaga inaad samayso cabasho aadna hesho jawaab waqtiyeysan oo habboon ee dareenkaaga.**

## 1.2 Codsiga iyo qeexidda

Qorshahaani wuxuu khuseeyaa dhammaan cabashooyinka aan helno laguna maareeyo habraaceena Maaraynta Cabashada[1].

Cabashadu waa tibaax qanac-la'aan ku saabsan badeecadeena, adeegeena, shaqaalaheena ama maaraynta cabashada.

## 1.3 Xeerarka maaraynta cabshooyinkeena

Habraaca maaraynta cabshooyinkeena wuxuu ku salaysan yahay xeerarka hagaya oo ujeeda:

- Fulinta iyo soo-dhaweynta cabashooyinka
- U-maaraynta cabashooyinka, si firfircoon, oo sugan oo caddaallad ah
- Hirgeli dhaqanka wax ka-barashada cabashooyinka iyo samaynta hagaajintooda.

FULINTA CABASHOOYINKA

Dhiirigelinta ra'yi-celinta iyo samaynta in si fudud loo cabto

MAARAYNTA CABASHOOYINKA

howlgelitaada iyo tallaabo qaadidda si loo xalliyo cabashada

BARASHADA IYO HAGAAJINTA

Baarista macluumaadka cabashada si loo hagaajiyo adeegyada iyo maaraynta cabashada

[1] Qorshaha Maaraynta Cabashadan iyo Tusaha Habraaca Maaraynta Cabashada Waxaan si wadajir ah loogu sheegay Heshiisyada Farankayska ah oo ah Habraaca Maaraynta Cabashooyinka.

### 1.3.1 Fulinta Cabshooyinka

Waxaan aqoonsanahay xaqaaga cabashada waxaana ballan-qaadaynaa inaan wax ka qabano dareenkaaga si caddaallad iyo fiefircooni ah. shaqaalaheenu waa kuwo aad u tababaran waxayna si firficooni ah kuu taageeri doonaan ayagoo raacaya habraacaas.

Waxaan aqoonsanahay in dadka qaarkiis ay qabaan baahiyo gaar ah ama u baahan yihiin caawimaad dheeraad ah markii ay cabashada samaynayaan. Waxaan siinaa dhowr dariiqo oo lagu sameeyo habraacaas sida ugu fudud.

Waxaannu noqon doonnaa kuwo u dabacsan marka cabashadaada wax laga qabanayo waana kula soo xiriiri doonaa sida ugu fudaydka badan ugu firfircoon. Waxaan adeegsan doonaa hababka maaraynta cabashada kuwaas oo nagu caawinaya inaan xallino cabashadaada sida ugu dhaqsaha badan.

### 1.3.2 Sida naloola soo-xiriiro haddii aad cabasho qabto

Si aad u hesho macluumaadka ugu dambeeyey oo ku saabsan sida naloola soo-xiriiro fadlan ka eeg www.ptv.vic.gov.au, ama ka wac Public Transport Victoria (PTV) Wicitaanka Lacag la’aanta 1800 800 007 (6am – saxda dhexe maalin kasta).

### 1.3.3 Maaraynta cabshada

Waxaan ujeednaa inaan qirno oo ka jawaabno si dhaqso ah cabashadaada waxaana garowsanahay arimaha qaarkood inay u baahan yihiin tallaabo degdeg ah. waxaan qiimaynaa cabasho kasta oo cusub si loo go’aamiyo tallaabada kowaad oo ugu habboon iyo in mudnaanta kowaad la siiyo ayadoo la raacayo arimaha la sheegay degdegooda iyo darnaantooda.

Cabashooyinka lagu qiimeeyey inay u baahan yihiin wax-ka-qabasho degdeg ah waxaa looga jawaabi doonaa saddex malmo shaqo. Cabashooyinka kale oo dhan waxaa looga jawaabi doonaa toddoba malmo shaqo. Haddii aysan sidaas suurtagalayn, waanu kula socodsiin doonaa waqtiga la fili karo iyo sababta loola soo daahay.

Habraaceena Maaraynta Cabashada waa mid caddaallad u ah dhamman qaybaha oo dhan wuxuuna hubsiiyaa arimaha in lagu maareeyo si macquul ah oo aan eex lahayn. Waxaan siinaa dariiqooyinka dib-loogi eego haddii aadan ku kalsoonayn natiijada, oo ay ku jiraan dib-u-eegidda maamuleed ee gudaha iyo dib-u-eegidda dibadeed oi uu bixiyo Qareenka Macaamiisha PTV iyo/ama Ombudsmanka Public Transport.

Waxaan ilaalin doonaa gaarnimadaada oo maarayn doonaa macluumaadkaaga shaqsiyeed ayadoo la raacayo shuruucda gaarnimada iyo qorsheyaasheena gaarnimada.

### 1.3.4 Barashada iyo hagaajinta

Macluumaadka cabashada waa isha ugu muhiimsan oo lagu cabiro sida aan wax u qabanayno. Shaqaalaheena si joogto ah ayey u baaraan macluumaadka cabashada si loo helo siyaabaha loo hagaajin karo sida aan u shaqayno iyo sida adeegyadena loo bixiyo. Waxaan soo-saarnaa warbixino bille ah oo mu saabsan raadadka cabashooyinka loo diray maaraynta maamulka sare waxaana ka qaybgalnaa shirarka Ra'yi-celinta Macaamiisha oo saddex billaha ah oo ay qabato PTV.

Waxaan samaynaa baarista sababta asalka ah oo ku saabsan cabashada si loo aqoonsado arimaha jira, iyo in lala shaqeeyo haya'daha ka midka ah adeegga si loo hagaajiyo waayo-aragnimadaada loogana hortago inay soo noqdaan.

Waxaan kaloo si adag uga shaqaynaynaa inaan si joogto ah u hagaajino Habraaceena Maaraynta Cabashada. Waxaan leenahay habraacyo hubanta tayada ee maaraynta cabashada iyo inaan siino rayi-celin shaqaalaha. PTV waxay samaysaa baarista cabashada sanadeedka waxayna raadin doontaa talooyinka ka yimaada Macaamiisha oo ku saabsan heerka qanacsanaantooda ee Habraaceena Maaraynta Cabashada.

# 2 Habraaca maaraynta cabashooyinkeena

Waxaanu leenahay saddex heer oo ah Habraaca Maaraynta Cabashooyinka (eeg shaxda1aad: Habraaca Maaraynta Cabashooyinka) Taasu waxay suuragalisaa in cabashooyinka ay xaliyaan shaqaalaha safkka hore si dhaksa leh meeshii ku haboon isla markaasna waxay kaalmaysaa fursado kale oo lagu tixgaliyo dareenkaaga hadii aadan ku qancin jawabaheenii hore..

**Shaxda 1: Habraaca Maaraynta Cabashooyinka**

## 2.1 Diiwaangelinta iyo go'aannada hore

Waxaan ku diiwaan-galinaa faahfaahinta cabashadaada xog-uririyaha jawaab celinta Macaamiisha waxaana u qoondaynaa tixraace baaq sira oo u gaara leh ee cabashada..

Waan tixgalinaynaa dareenkaaga waxaan uga shaqaynaynaa sida ugu wanaagsan ee laguu caawin karo. Inta badan waxaan karnaa inaan cabashadaada u xalino si dhakhsa ah. haddii aan arrinta la xalin Karin markiiba, kooxdeena takhasuska u leh maaraynta cabashooyinka ayaa tixgalin dheeri ah siinaya,.

**Dariiqooyinka Sahminta go'aannada iyo baarista – Kooxda Maaraynta Cabashada**

Kooxdeena Maaraynta cabashada ayaa qiimaynaya cabashadaada waxayna eegayaan siyaalaha laguula xalin karo arrintaada. Haday lama huraan noqoto waxaan samaynaynaa baaris ku saabsan arrimaha aad ka cabatay.

- Cabashada degdegga ah*

  Waxaan diyaarinayna jawaab celin cabashadaada ah saddex bari  maalmaha shaqada gudahood markaan helo cabashadaada. Hadaan u baahno waqti intaa ka badan oo aan ku tixgalino arrinka waan kuu sharxi doonaa.

- Cabashada caadiga ah

  Markaan helo, Waxaan ku samaynaynaa cabashadaada jawaab celin 7 maalin shaqo gudahood. Hadaan u baahano in arrinta la tixgaliyo intaa ka badan, waanu kuu sharxi doona.

Hadaad ku qanacdo jawaab celinteena, cabashadaada waa la xirayaa. Hadaadanse ku qancin, waxaad waydiisan kartaa tixgalin intaa ka badan oo uu ku jiro maareeyaha kooxdeena .maaraynta cabashooyinka.

**Kordhin**

U-qareenidda macaamiisha AMA Ombudsmanka Gaadiidka Dadweynaha

**U-qareenidda macaamiisha**

Waxaad dooran kartaa in cabashadaada ay dib u eegaan Qareenka Macaamiisha PTV. Hadaadan ku qancin waxqabadka Qareenka Macaamiisha PTV, waxaad cabasho u gaysan kartaa Ombudsmanka Gaadiidka Dadwaynaha.

**AMA**

**Ombudsmanka Gaadiidka Dadweynaha**

Waxaad dooran kartaa inaad cabashadaada ku wareejiso Ombudsmanka Gaadiidka Dadwaynaha si uu u siiyo tixgalin dibadaa ( adoon marka hore aadin afhayeenka Gaadiidka Dadwaynha ee PTV-da). Ombudsmanka Gaadiidka Dadwaynahu waa qof khilaaf xaliye madaxbanaan ah oo kaa caawin kara xal u helida muranada ku saabsan Gaadiidka Dadwaynaha ee Victoria gudaheeda ah.

*Adeeg ahaan, waxaan ogolaanay in arimaha qaarkood lagu xallin doono degdeg. Kuwaani guud ahaan waxay la xiriiraan arimaha ammaanka degdegga ah, xaaladaha degdegga, helitaanka iyo waxyeelaynta hantida.